



**waterfront**  
SEATTLE



# BELL STREET

Jawaab-celinta Fikradda Guud ee  
Nakh-shadda oo Kooban





## Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Yoolka mashruuca Bell Street waa in la sii wanaajiyo isku-xirka laga soo bilaabo Belltown ilaa biyo xigeenka, gaar ahaan jidka Bell St, inta u dhaxeysa jidadka 1st iyo Elliott. Bilaha Jannaayo iyo Febraayo 2023, Xafiiska Mashruucyada Biyo-xigeenka iyo Kuwa Madaniga ah ayaa wuxuu qabtey aqal furan oo ka dhacaya barta internet-ka wuxuuna u soo bandhit Golaha Bulshada Belltown si ay aaraa/fikrado uga soo ururiyaan bulshada Belltown oo ku saabsan mudnaanaha horumarineed ee jidkan fidsan ee Bell St.

### *Imaanshaha*

- 1,097 adeegsadaayaal gaar ah ayaa soo booqdey aqalka furan ee internet-ka intii u dhaxeysay 31-ka Jannaayo iyo 12-ka Febraayo, 2023
- 511 jawaabo ayaa laga bixiyey sahanka aqalka furan ee internet-ka ka dhacey
- 51 qofood ayaa ka soo qaybgaley Golaha Bulshada Belltown (18 oo qof ahaan uga soo qaybgaley, iyo 33 oo aaladda Zoom-ka uga soo qaybgashey)

### *Jawaab-celin muhiim ah*

- Jawaab-bixiyeyaashu waxay intooda badani doonayaan in jidkan fidsan ee Bell Stuu mudnaanta koowaad siiyo dadka lugeynaya iyo baaskiileyda marka loo eego baabuurtta, iyada oo 68.9% ay doorteen socod/kabo taraatax ku wadasho, 25.8% ay doorteen baaskiil/mooto laba lugoodley ah ku socosho iyada oo 5.3% ay doorteen baabuur wadasho in ay tahay habka socdaalka ay doonayaan horumarinaddan in ay diiradda saaraan.
- Waxaa jira rabitaan ah in la abuuro meel ammaan ah, nadiif ah oo lagu raaxeysan karo looguna talagalay dadku in ay isugu yimaadaan oo ayna sii joogaan.
- Bulshadu waxay jeelaan lahayd in halkaasi loo helo waddo soo dhaweyn leh oo bannaan ah oo loogu talagalay dadka deggan degaanka iyo kuwa ku dalxiisayaba in ay isugu kala gooshaan Belltown iyo biyo-xigeenka iyada oo la adeegsanayo calaamado iyo waxyaabo muuqda oo dadka u soo jiida degaankan.

## Hordhac

Mid ka mid ah yoolasha Waterfront Seattle waa in la abuuro isku-xirro badan oo bari-galbeed isku xiraya raaxo leh oo la mari karo looguna talagalay dhammaan hababka socdaalka ee waddada, oo ay ku jiraan kuwa taga Belltown, faras magaalaha iyo fagaaraha Pioneer Square.

Jidka cusub, Elliott Way, ayaa wuxuu bixin doonaa isku-xir cusub oo u dhaxeeya Belltown iyo biyo-xigeenka wuxuunna jidka Bell St ku xiri doonaa waddooyinka Elliot iyo Western. Isku-xirkan cusub ayaa waxaa ku jira seedad baaskiilladu ay maraan oo ilaalsan, socod-hareereedyo, iyo qurxinta muuqaal dhuleedka. Jidka Lenora St, oo laba boloog koonfurta ka xiga jidka Bell St, ayaa wuxuu bixin doonaa isku-xir toos ah oo u dhaxeeya waddada Elliott Way ee cusub, oo ay ku jiraan buundo dadka lugeynaya maraan oo dhowaan la cusbooneysiyyay iyo wiish dadka ka caawinaya in uu u fududeeyo in ay ku lugeeyaan, baaskiil ku wataan, iyo/ama kabo taraatax ku wataan inta u dhaxeysa Belltown iyo biyo-xigeenka.

Yoolka mashruuca Bell Street waa in uu sii wanaajiyo isku-xirka laga soo bilaabo Bell St ilaa biyo-xigeenka, gaar ahaan laga soo bilaabo jidka 1st ilaa iyo jidka Elliott. Sida qayb mashruucan ka mid ah ahaan, Waterfront Seattle wuxuu hayaa fursad uu ku ballarinayo goobaha dadweynaha uguna darayo muuqaal qurxoon oo cusub iyo adeegyo kale iyada oo qaybta jidka Bell St uu noqonayo jid hal-dhinac aada. Wadarta guud ee miisaaniyadda mashruuca, oo ay ku jiraan nakh-shadda, ruqsadda, iyo dhismahaba waa \$3.3 milyan.

Habka dadka lagu gaarsiiyey marxaladdan koowaad ee hannaanka nakh-shadda waxaa ku jirey aqal furan oo ka dhacaya barta internet-ka oo furnaa 31-ka Jannaayo ilaa 12-ka Febraayo, 2023, iyo xog-waran laga sameeyay Golaha Bulshada Belltown markii ay taariikhdu ahayd 8-da Febraayo, 2023. Yoolku wuxuu ahaa in la maqlo waxyabaha mudnaanaha koowaad bulshada u leh ka hor inta aan la sameyn fikradaha nakh-shadda.

## Qalabka ogeysiinta iyo gaariista

Fursaddan ka-qaybqaadashada ayaa kor loo qaaday iyada oo loo marayo hababkan ogeysiinta ee soo socda:

- **Saabab u qaabeysan qaabka A oo lagu xayaysiinayo aqalka furan ee barta**



*Saabab u qaabeysan qaabka A oo leh koodhadhka QR oo kuu horseedaya sahanka barta internet-ka ka dhacaya ayaa la dhigay isgoysyada muhiimka ah ee jidka Bell St.*



internet-ka ayaa waxaa la dhigey jidodka Bell St iyo First Ave, iyo isgoysyada jidodka Bell St iyo Elliott Ave.

- **Warside elektaroonig ah (E-newsletter)** ayaa loo diray 11,124 macaamiil oo rukun u ah liiska iimayl-ka barnaamijka Waterfront Seattle.
- **Email-lo** ayaa loo direy daneeyeyaasha muhiimka ah iyo dadka deriska la ah mashruuca si gacan looga geysto faafinta wacyigelin ku saabsan fursaddan jawaab-celinta.
- **Daabacaadda bogga internet-ka** ayaa lagu wadaagey bogga internet-ka SDOT oo ku saabsan fursadda ka-qaybgalka.
- **Hadallada kooban ee ammaanta iyo xayaysiinta ah ee warsidaha ayaa waxaa lala wadaagey** Golaha Bulshada Belltown (Belltown Community Council), Belltown United, iyo Ururka Faras Magaalaha Seattle (Downtown Seattle Association).
- **Hadal kooban oo ammaan iyo xayaysiin ah oo lagu qoro baraha bulshada** ayaa lagu daabacay koontooyinka baraha bulshada ee Waterfront Seattle, oo ay ka mid yihiin baraha Instagram,

**seattledot** @seattledot

Changes are coming to Bell St & you can help [@WaterfrontSEA](#) identify how to best enhance the public space, add new landscaping & amenities, & better connect Belltown to the waterfront!

More info on our blog:

[sdotblog.seattle.gov](http://sdotblog.seattle.gov)  
Changes are coming to Bell St and Waterfront Seattle wants to hear from you... Waterfront Seattle is kicking off a design process for the Bell Street project. This blog shares a link to the online open house website.

4:21 PM · Jan 31, 2023 · 3,345 Views

**waterfrontsea**

Liked by **mikhail.rock** and 91 others

**waterfrontsea** The goal of the Bell Street project is to improve connections from Belltown to the waterfront, specifically from 1st Ave to Elliott Ave. We have an opportunity to expand public space and add new landscaping and other amenities. We want to hear from you on what you'd like to see.

Join us at tomorrow's Belltown Community Council meeting at 6:30 PM and participate in our survey through Feb. 12!

Link in bio for more details!

Fursadda jawaab-celinta ayaa waxaa lagu wadaagey madallada baraha bulshada.

Twitter iyo Facebook.



## Faallooyinka xog-waranka Golaha Bulshada Belltown

51 qof, oo qaarkood qof ahaan uga qaybgeliya qaarna aaladda Zoom kaga soo qaybgaley, ayaa ka qaybgaley xog-waranka [Golaha Bulshada Belltown](#) markii ay taariikhdu ahayd 8-da Febraayo, 2023.

Waa kuwan qaar ka mid ah waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee laga soo qaatey wada-sheekaysigaasi:

- Waxaa jira rabitaanka kaabayaasha dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiileyda oo hagaagsan kuwaas oo Belltown si toos ah ugu xiraya waddada Elliott Way iyo jidka dhinac mara biyo-xigeenka.
- Dhismayaasha ganaci ee degaankan waxay ku tiirsan yihin maraakiibta dalxiiska xilliga kuleylaha yimaada halkan sidaa daraadeed in Belltown laga dhigo xaafad lagu socon karo ayay iyagu faa'iido badan ugu jirta.
- Dadka degaanka iyo milkiilayaasha ganacsiga waxay doonayaan sii wanaajinta hannaanka wado helidda iyo khariidadda/calaamadaha hagaya dadka soo booqanaya dukaamaha tafaariiqda iibiya ee ku yaalla bartamaha Belltown ee ka imaanaya biyo-xigeenka. Ka-qaybgalayaasha ayaa sidoo kale soo jeediyay in goobta lagu daro baaq muuqaal ah oo dadka u soo jiidaya xaafadda waxaanna jiray xiiso badan oo loo qabey halka buundada calaamadda taariikhiga ah laga dhigayo.
- Waxaa jira luuqaq ku yaalla jidka Bell St oo u baahan in wax laga beddelo.
- Xubnaha bulshada waxay doonayaan in mashruucu uu adeegsado kana faa'iideysto waxyaabaha jira sida geedaha, iftiinta dabiiciga ah iyo sameyska dhismeyaasha taariikhiga ah ee muujiya aqoonsiga Belltown.
- Waxaa jira xoogaa walaacyo ah oo ku saabsan baaxadda la rabo in aysan ku habbooneyn miisaanjiyadda loo qoondeeyay mashruucan.
- Waxaa kaloo jira walaacyo ku saabsan abuurista fursad soo dhaweynaysa waxqabadyada aan loo baahnayn taasina way adkaaneysaa in la sii wado.
- Ammaanku waa mudnaanta koowaad.

## Natijjooyinka sahanka barta internet-ka ka dhacey


511 qofood ayaa ka soo jawaabey sahanka aqalka furan ee internetka ka dhacey intii u dhaxeysay 31-ka Jannaayo iyo 12-ka Febraayo, 2023. Waxaa hoos ku xusan waxyaabahii ugu muhiimsanaa ee laga soo qaatey sahanka, fadlan ka eeg natijjooyinka sahanka oo dhan lifaaqa.



## Waa maxay habka socdaalka ee aad hadda ku isticmaasho waddada Bell St inta u dhaxeysha jidodka Elliott Ave iyo 1st Ave? Dooro dhammaan kuwa ku habboon.

Ka-qaybgalayaasha barta internet-ka ayaa ugu horreyn ku lugeeya/kabo ku taraaraxa ama baaskiil/mooto laba lugoodley ah ku wadata jidka Bell St.

- 21.6% ee jawaab-bixiyeyaasha ayaa gaari ku wata
- 87.6% ee jawaab-bixiyeyaasha ayaa ku lugeeya/kabo ku taraaraxa
- 52.8% ee jawaab-bixiyeyaasha ayaa baaskiil/mooto laga lugoodley ah ku wada
- 6.5% ee jawaab-bixiyeyaasha ma adeegsadaan jidka Bell St inta u dhaxeysha waddooyinka 1st iyo Elliott avenues
- 1.8% ee jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in ay adeegsadaan dhammaan hababka gaadiidka ee kor ku xusan




## Waa maxay aragtida aad hadda ka haysato inta u dhaxeysa Jidka Bell Street inta u dhaxeysa waddooyika Elliott Ave iyo 1st Ave?

Ku dhowaad 96% ee ka-qaybgalayaasha waxay sheegeen in aragti aan wanaagsaneyn ama dhexdhedaad ah ay ka heystaan jidka Bell St ee hadda.

- 50.2% Aan wanaagsaneyn
- 44.2% Dhexdhedaad ah
- 5.6% Wanaagsan

5.6%



Ka-qaybgalayaashu waxay haysteen fursad ay ku sharxaan kala doorashadooda Wanaagsan, Aan Wanaagsaneyn ama Dhexdhedaad ah. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee laga soo qaatey jawaabahaasi.

**Nakh-shadda hadda ee jidka waa mid ay baabuurta udub-dhexaad ah oo ay ammaandarro ka dareemaan baaskiileyda.**

- “Jidku ma lahan tashiilaadyo baaskiil, jidka Bell-na wuxuu leeyahay socod-hareereedyo aad cirriiri u ah. Kaabado ku teedsan jidka 1st Ave ayaa loo baahan yahay.”
- “Baaskiiley ahaan aad ayay halis u tahay in horey loogu socdo jidka, maadaama baabuurro badan oo soo socda ay adeegsadaan Jidka Bell St inta u dhaxeysa jidakda 2nd iyo 1st (taas oo "xiran"). Marka hoos looga sii hoobanayo, waddadu waa mid hoos u yuuqan laakiinse aan sinneyn taas oo keenaysa in ammaandarro la dareemo marka loo dhowaado jidka Western Ave.”
- “Gebi ahaanba ma lahan kaabayaasha baaskiilkha ee la kala saafey/ilaaliyey, meel baabuurta la dhigto oo jidka ku teedsan, mudnaansiinta guud ee baabuurta (aan la jaanqaadin himilada eber)”
- “Waxaan maalin walba baaskiil u wataa shaqadeyda waxaanna isticmaalaa jidka wanaagsan ee Bell St. Waa in aan ku leexdaa Waddada 2nd Ave in kastoo aan ku noolahay jidka Galbeedka(Western) sababta oo ah jidatka Bell St iyo Western ma lahan wax ilaalin ah wixii ka dambeeeya 1st Ave.”

**Dadka lugeynaya ayaa sidoo kale dareema ammaandarro sabab u ah aragtida xaddidan ee meelaha u calaamadeysan dadka lugeynaya in ay jidka ka gudbaan, marsha-biyeed aan**



---

**sinnayn iyo baabuur xawaare xawli ah ku socda. Dadka qaarkood ee deggan hareeraha marinka Bell St ayaa ka welwelsan in gaadiidka sii kordhaya ee ka imaanaya Waddada Elliott Way ee cusub ay ka dhigi doonnaan jidka Bell St mid ammaanka ay ku qabaan dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiilada wata uu yar yahay.**

- “Wuxuu leeyahay socod-hareereedyo macquul ah, ma xuma in lagu socda, laakiinse waxaa sidan ka sii wanaagsanaan lahaa haddii socod-hareereedyadu ay sidan ka sii ballaarnaan lahaayeen oo marsha-biyeedkuna uusan lahaan lahayn carqalado/meelo kala dhaadheer. Maadaama ay jiraan gaadiid 2-dhinac ee waddada u kala gooshaya iyo baabuur la dhigtay waddada labadeeda dhinac ma jiro muuqaal wanaagsan oo loogu talagalay dadka lugeynaya ee waddada ka gudbaya, oo ammaan ma ahan meeshan in baaskiil lagu wato seedka waddada. Geeduhi waxay meel wanaagsan oo wacan ka dhigaan meel haddii kale noqon lahayd meel aad u xun.”
- “Baabuurta ayaa si xawaare leh uga soo daadega bururta. Waxaa jirey shilal badan oo ka dhaceyt laabadka jidadka Bell iyo Western. Qof ku lugeeya oo degaanka deggan ahaan, ammaan kuma dareemo ka gudubka mid kasta oo ka mid ah isgoosyada u dhaxeeya Bell iyo Western. Baabuurta ayaa si dhif ah uga dangala calaamadda Joogso ee goobta waxaanna dhowr jeer aniga oo iskudayaya in aan jidka ka gudbo ku sigtay in ay baabuur igu dhacdo.”
- “Waxaan ku noolahay meel jidkan saaran (Western Ave) iyada oo jidka cusub ee Elliott Way uu ku soo daro baabuur badan waddadan cufan ee ay dadka badani deggan yihiin, waxaan si buuxda ugu BAAHANAHAAY in aY deggaankan isticmaalaan dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiillada wata.”

**Horumarinnadan soo socda waa kuwee kuwa aad jecleen lahayd in aad ku aragto Jidka Bell, inta u dhaxeysa waddooyinka Elliott Ave iyo 1st Ave? Fadlan tax adiga oo kala horreysiinaya kala doorashooyinkan min 1 (ugu muhiim yar) ilaa 5 (ugu muhiimsan)**

Ka-qaybgalayaashu waxay taxi karaan iyaga oo kala horreysiinaya waxyaabaha min hal ilaa shan, iyada oo shan ay ka dhigan tahay midda ugu muhiimsan oo ay tahay mudnaanta koowaad in la siiyo. Darajada ayaa ka-dib la xisaabiyyaa sidaa daraadeed ayaa hal waxay ka dhigan tahay lambar sare oo gadaal dambe ah oo u kala horreysiinaysa sida ay u kala mudan yihiin.


Jawaab-bixiyeyaasha ayaa u doortey, sida ay u kala muhiimsan yihiin, farshaxanka, metelaadda taariikhda dhaqanka iyo tan dabiiciga ah, gaarista, dhirta iyo ammaanka. Haddii si kale loo dhigo, farshaxanka ayaa la xusay in uu yahay midka ugu muhiimsan iyada oo ammaankanna uu yahay midka ugu liita.



## **Horumarinnada jidka, waa maxay habka socdaalka aad jeelaan lahayd in aad aragto in mudnaan koowaad la siiyo?**

Ka-qaybgalayaashu waxay doonayeen in ay arkaan hababkan socdaalka ee soo socda in mudnaanta koowaad la siiyo:

- 68.9% lugeeyya/kabo taraatax ku wata
- 25.8% baaskiil/mooto laba lugoodley wata
- 5.3% gaari-wata





## **Ma jiraan wax horumarinno gaar ah oo aad jeclaan lahayd in aynu tixgelinno?**

Jawaab-bixiyeyaasha ayaa aad ugu faraxsan in ay arkaan horumariino laga sameynayo jidkan fidsan ee Bell St. Jawaab-celinta waxay si aad ah diiradda u saareysaa mudnaansiinta waddooyinka ay maraan dadka lugeynaya iyo baaskiileyda, abuurista meel dadweyne wanaagsan oo wacan oo loogu talagalay in ay dadka isugu yimaadaan oo ayna sii joogaan, xaqijinta meel ammaan iyo nadiif ah, iyo in dariiqan laga dhigo dariiq soo dhaweyn leh, la geli karo oo bannaan looguna talagalay dadka deggan iyo dalxiiska u dhaxeeya Belltown iyo biyo-xigeenka.

### ***Mudnaanta koowaad sii dadka lugeynaya iyo baaskiileyda marka loo eego baabuurta***

Jawaab-bixiyeyaasha intooda badani waxay jecel yihin mudnaansiinta dadka lugeynaya iyo baaskiileyda, iyo gebi ahaanba in la mamnuuco baabuurta. Gaar ahaan, seedka laba-dhinacalaha ah ee baaskiilka mara ee ilaalsan iyo socod-hareeradyo ballaaran ayaa si joogto ah loo xusay in uu yahay isticmaalka la doorbidayo ee goobtan.

Faallooyinka qaar ee ku saabsan mudnaansiinta dadka lugeynaya:

- “Ka dhig wax kasta ee jira bariga albabka garaashka Abaarmanka 2300 Elliot meel ay maraan dadka lugeeya oo keliya. Mashaariicda baabuurta xuddunta u ah ee faras magaalaha waa kuwo laga daaley, aynu dhisno mustaqbalka.”
- “Kani waa marin loo maro biyo-xigeenka. Fadlan dadka lugeynaya ka dhig mudnaan cad.”
- Ka-qaybgale ayaa si gaar ah u doonayey horumarinno si loo abuuro waddo ammaan ah oo dadka lugeynaya ku tagayaan kagana soo noqonayaan maraakiibta dalxiiska.
- “Waa dalxiisayaasha lugeynaya kuwa u baahan waddadan si ay ugu habboonaato - waa waddo dagaandag ah mana lahan meel lagu nastro waxayna dhib ku gaaran ilaa 1st (waxaa loo baahnaa in ay yeelato meelo lagu nastro oo kuraaso leh).”

Faallooyinka qaar ee ku saabsan mudnaansiinta baskiillada:

- Dhowr jawaab-bixiyeyaal ayaa soojeediyay in la sameeyo seed ay baaskiiladu maran oo ballaaran oo aada taagga sare si loo suurageliyo meel loogu talagalay kuwa tartiibka u socda.
- “Seedad 2-dhinacle ah oo ay baaskiiladu maran oo ilaalsan. Fadlan ka dhig EB aad u ballaaran si loogu oggolaado baaskiillada elektarooniga ah in ay si iskumid ah ugu gudbaan taagga sare.”
- “Waxaa aad u fiicnaan lahayd in la helo wiish baaskiillada keenna xagga sare kuna xiran faras magaalaha iyo hab ay ku adeegsan karaan saaxiibada kursiga naafada adeegsada.”

- Waxaa jira xoogaa farxad ah oo ku saabsan in la helo dhul siman oo loogu talagalay baaskiileyda oo aan ahayn socod-hareereedka hadda.

Jawaab-bixiyeyaasha intooda badani waxay doorbidayaan in meesha laga saaro meelaha baabuurta la dhigto ee jidka dhexdiisa ah, qaarbaa sheegay dhulka lootooyinka baabuurta la dhigto ee waddada u dhow in kuwa u baahan ay baabuurtooda dhigan karaan. Qaar ayaa diiday, gaar ahaan saaxiibada sheegay in ay ku nool yihiin meel u dhow oo ayna u baahan yihiin in ay helaan meel baabuurta la dhigto ama ay baabuurta ay rarka qaadaya ama dejinaya ay istaagaan.

- “Fadlan meesha ka saar dhammaan meelaha baabuurta la dhigto. Maadaama aanu jirin wax ganacsiyo ah oo halkaasi ku yaalla, gebi ahaanba waa wax aan loo baahnayn waxayna ciriri u keenayaan gaadiidka jidka maraya.”
- “Meesha ka saar meelaha baabuurta la dhigto si loo helo jidad ay baaskiiladu maraan iyo socod-hareereedyo ballaaran. Tani waxay ka dhigeysa socdaalka magaalada mid hufan, ammaan ah, deggan, nadiif ah, oo aad ugu wanaagsan qof walba.”
- “U dhaaf ugu yaraan hal dhinac oo jidka Bell Street ah meel ay baabuurta dhigtaan martida iyo dadka soo booqanaya.”
- “Waxaan sidoo kale jeelaan lahaa in aanan ku arkin meel baabuurta la dhigto marka laga reebo meelaha rarka lagu dejiyo dhismayaasheenna hortooda ah.”
- “Meel kale oo baabuurta la dhigto ha baabi'inin. Wuxaan ka daaley dagaalka ay Seattle ku soo qaadey baabuurta. Ma filan karto in aad jidadka ka baabi'iso dhammaan meelaha baabuurta la dhigto iyo in ay dadku ku farxaan imaanshaha faras magaalaha. Sidaasi uma shaqeynayso.”

#### ***Abuur goob dadweyne soo dhaweyn leh oo firfircooni iyo xiiso leh***

Jawaab-bixiyeyaal badan waxay jeelaan lahaayeen jidkan fidsan ee Bell Street in uu noqdo goob dadweyne ammaan ah oo firfircooni leh halkaasi oo ay dadku isugu imaan karaan siinna joogi karaan, oo ay ku jiraan dhir badan, kuraas, iftiin iyo farshaxan. Dhowr qofood ayaa soojeediay in lagu daro jardiimo la fadhiisto oo dadka u saamaxaya waxqabadyo xilliyeedka ee bulshada, iyada oo qaar kalena ay soojeediyeen in lagu daro qalab lagu jimicsado ama waxyaboo kale in lagu rakibo oo loogu talagalay isticmaalka dadweynaha.

- “Diiradda saar qurux nololeed oo leh geedo, geedo-gaagaab iyo dhir soo-jeedinaysa duurjoogta, oo ay ku jiraan cayayaannada sida balanbaalista iyo shinnida.”
- “Kuddaridda waxyaboo sharraxaad ama midabyo kala duwan leh si loo nooleeyo jidka.”
- “Kursi dheer ma dhigi kartaa meel u dhow isgoyska jidadka Bell iyo Western? Wuxaan jeelaan lahaa in uu jidku yeesho beer yar oo aan gidaar lahayn halkaasi oo aad fariisan

karto adiga oo ku raaxeyasanaya muuqaalka. Wuxaan waqtii badan ku qaataa socod-hareereedka si aad u daawado muuqaalka -- waa mid ka mid ah meelaha yar ee la mahdiyey ee xaafadda ka midka ah ee laga daawan karo buurta.”

- “Kuddar dhismaha biyaha duufaanta ee loogu talagalay maareynta biyaha duufaanta iyo kursiyo dhaadheer oo loogu talagalay dadka lugeynaya si ay u eegaan dhismaha biyaha duufaanta iyo waxyaabaha kale inta uu buurta sii fuulayo.”
- “Beerta bulshada ayaa noqon lahayd wax cajiib ah!”

Waxaa jira xoogaa walaacyo ah oo ku saabsan in degaanka laga dhigo mid nadiif ah oo ammaan ah, gaar ahaan haddii ay nakh-shadu leedahay kuraas.

- Waxaa jira rabitaanka gacan ku hayn joogto ah oo loo baahan yahay, oo ay ku jiraan qaadista qashinka iyo tirtiridda feegaarada.
- “Goobaha dhirta ka yar ee ku yaalla Bell ilaa Bariga si fiican uma shaqeeyn.” Dhowr jawaab-bixiyeyaal ayaa sheegay in dhir yaridu ay keenayso qashin ku daadin iyo in aannu jirin dayactir joogto ah oo ku filan.
- Waxaa jira walaacyo ku saabsan kuraasta iyo meelaha dadweyne ee aan hawsha ka socon in ay goobta u soo jiidayaan burburin iyo hawlo kale oo aan loo baahnayn.

### ***Hubso waayo-aragnimo ammaan ah oo la heli karo***

Haddii leen gaadiidku maro la sameeyo, jawaab-bixiyeyaal dhowr ah ayaa waxay doonayaan in la xaqiijiyo oo la kala saaro dadka lugeynaya iyo baaskileyda iyo gaadiidka iyo in tallaabooyin lagu qaboojinayo gaadiidka in la hirgeliyo. Waxaa jira walaacyo ku saabsan gaadiidka oo si xawli ah u socda in ay fuulaan dalcadda buurta. Dhowr soojeedimo ayaa la bixiyay oo ay ku jiraan dareemayaasha nalka joogsadka si loo oggaado baaskileyda jidka ka gudbeysa, nalalka meelaha ay dadka lugeynaya jidka ka gudbaan ee bigleeya, askariga jiifka ee xawaarahaa iyo yareynta gacanka leexashada ee baraha laga galu jidka Bell St.

- “Fadlan tixgeli askariga jiifa ee laga hirgelinayo dariiqyada yaryar hortooda. Baabuurta ayaa mararka qaarkood si degdeg ah uga soo baxa kuna soo dhaca soonayaasha ay maraan dadka lugeynaya iyo baaskiillada.”

Waxaa jiray dhowr su'aalood oo ku saabsan sababta jihooinka halka-dhinac ee jidka Bell St, inta u dhaxeysa waddooyinka First iyo Elliott, ay midba midka kale u wajahayaan. Waxaa jira walaacyo ah in ay tani u horseedayso jahwareer iyo isdhexgal khatar ah jidka Western.

Jawaab-bixiyeyaal badan waxay jeelaan lahaayeen in ay arkaan goobtan oo ay adeegsanayaan dadka lugeynaya, sida hirgelinta tallaabooyin lagu yareynayo heerka dagaandaga, iyo in ay goobtaasi sidoo kale yeelato iftiin dheeraad ah.



- 
- “Waxaan sidoo kale jeelaan lahaa in aan arko in si gaar ah loo hajaagiyo socod-hareereedyada si ay u yeeshaan dhul aan lagu sabiibixin qaybta dalcadda ah ee u dhaxeysa jidodka Western iyo 1st Ave, si loo helo waayo-aragnimo socod wanaagsan oo ammaan ah.”
  - “Tixgeli in loo sameeyo jarjanjarrooyin iyo gacan-qabsiyo (si la mid ah jidka Vine St). Ma laga yaabaa in sigsaag loo yeelo duulimaad kasta? Sidoo kale, fadlan mudnaansii in dib loo soo celiyo wiishka jidka Lenora St. Guud ahaan, tiirada dagaandagga u dhaxeeyaa jidka 1st Ave iyo biyo-xigeenka, Beerta Sculpture iwm waxaa ka jira dhibaato ah in la maro.”
  - “Tixgeli in aad u sameyo ballac waddo oo dheeri ah socod-hareereedka si socod-hareereedka uu u laab-laabto, taas oo kordhineysa dhererka masaafada la socdey si ay u yeelato dagaandag yar.”
  - “Qoysaska haysta kursiga lagu riixo carruurta iyo carruurta yaryar waxay u baahan yihiin meel bannaan oo dheeri ah iyo dhul aad u siman.”

#### ***Isku-xir Belltown iyo biyo-xigeenka***

Dhowr jawaab-bixiyeyaal ayaa sheegay in qaybtan jidka Bell St ay ahayd isku-xirkka u dhaxeeyaa Belltown iyo biyo-xigeenka oo sidaa daraadeed waa in ay dad u soo jiidaa, dadka oo dhan ay mari karaan, oo ayna taageerto khariiradda jid-helidda.

- “Kuddar calaamado, khariiradda degaanka ee jid raadinta, baaqyo muuqaal ah, iwm. oo si cad u muujinaya isku-xirrada, fursadaha, iyada oo la adeegsanayo isku-xirkka dadka lugelynaya oo wanaagsan, gaar ahaan loogu talagalay dadka soo booqanaya ee aan aqoonta u lahayn xaafadaha Magaalada.”